



Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu noo sheegay isagoo Runlow la rumaysto ah: Abuurida midkiin waxaa lagu jamciyaa uurka hooyadi afartan maalmood iyo afartan habeen

Cabdullaahi Binu Mascuud Allaah ka raali ahaadee waxaa laga wariyey: Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu noo sheegay isagoo Runlow la rumaysto ah: Abuurida midkiin waxaa lagu jamciyaa uurka hooyadi afartan maalmood iyo afartan habeen, ka dib wuxuu noqon xinjir intaas in le'eg, ka dib wuxuu noqon cad hiliba intaas in le`eg, markaas ayaa loo soo diraa malag, waxaana la faraa afar kalmadood, wuxuu qoraa: risiqiisa, cimrigiisa, camalkiisa iyo inuu yahay mid liibaanay ama hoogay, ka dib naftuu ku afuufin, midkiin wuxuu camal fali camalka Ahlu janaha ilaa marka uu u jiro janada dhudhun wax le'eg ayaa qadarkii u qornaa soo hormarin wuxuuna camal fali camalka Ahlu naarta markaasuu naarta galin, midkiin ayaa camal fali camalka Ahlu naarka ilaa uu u jirsado naarta dhudhun wax le'eg waxaa soo hormarin qadarkii u qornaa wuxuuna camal fali camalka Ahlu janaha markaasuu janada galayaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu yiri Ibnu Mascuud: wuxuu noo sheegay Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate isago runlow ah oo la rumaysto, isagoo Ilaahay rumaystay. wuxuu yiri: midkiin waa la jamciyaa abuuritaankiisa, taasina waa hadii ninku xaaskiisa u galmoodo manidiisu waa baahsan tahay waxaa lagu aruurin uurka gabadha mudo afartan beri ah isagoo candhuuf u eg. Ka dib wuxuu noqon xinjir taaso ah dhiig adag, waana afartanka labaad. Ka dib wuxuu noqon cad hiliba waana cad yar oo la calalin karo, waana afartanka saddexaad, Ka dib Ilaahay wuxuu u soo diraa malag, naftuuna ku afuufaa afartanka saddexaad markay dhamaato, Waxaa la faraa malaga inuu qoro afar kalmadood oo ah: Risiqiisa, oo ah inta ay dhan tahay nicmada uu helaayo inta uu nool yahay, Ajashiisa, waana intuu aduunka joogi doono, Camalkiisa, oo ah mid hoogay ama liibaanay midkuu ahaan doono. ka dib wuxuu Nabigu ku dhaartay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate qofku inuu camalka Ahlu janaha camal falin, kaasoo camal saalixa, sida dadka u muuqata, ilaa markay janada u jiro dhudhun, waxaa loo jeeda markay janada uga dhiman tahay inta qofka dhulka maraya ay uga dhiman tahay wax dhudhun le`eg waxaa ka qaalib noqda qadarkii u qornaa wuxuuna camal fali camalka Ahlu naarka oo loogu khatimin naartuuna galin, waayo shardiga lagu aqbalayo camalkiisa waa inuu qofku ku sugnaado camalkiisa saalixa ah oo uusan xumaana ku badalin, mid kale oo dadka ka mida ayaa camal fali camalka Ahlu naarka ilaa uu ku dhawaado inuu galo, waa sida isago naarta u jirsaday wax le'eg dhudhun dhulka ah, waxaa ka kormarin qadarkii Ilaahay u qoray wuxuuna camal fali camalka Ahlu janaha wuuna galin janada.

النّجَاةُ الْخَيْرِيَّةُ
ALNAJAT CHARITY

